

## Caawimo Sharci

Shaqaalaha maxkamadda lama oggola inay bixiyaan talo sharci. Haddaad kiiskaaga u rabto caawimo sharci, waxaad samaysan kartaa qareen. Sidoo kale waxaad booqan kartaa websaytka maxkamadda, kaasi oo uu ka mid yahay bog la dhaho "Legal Help & Guides (Caawimada & Hagayaasha Sharci)" oo ay ku qoran tahay macluumaad ku saabsan sida loo helo caawimo sharci. Adeegyada qaar waa bilaash ama way qiime jaban yihin marka la eego dhinacyada saboolka ah. Booqo www.courts.maine.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

**Si aad wax badan u ogaato booqo**
**www.courts.maine.gov**

# QAADASHADA LACAGTA MAXKAMADDU KUU XUKUNTO



Laanta Caddaaladda Maine
Xafiiska Maamul ee Maxkamadaha

Haddii go'aanka maxkamadda ee Sheegashooyinka Fudud ama kiiskaaga madaniga ah kuu xukumo in lacag lagu siiyo, waxaad xaq u leedahay inaad lacagtaas qaadato. Haddii lacagta laguu xukumo lagu siin waayo, waxaad haddana dhinaca kale uga yeeri kartaa maxkamadda si loogu amro inuu lacagta ku siiyo. Dhacdadan maxkamadda waxa loo yaqaan "dhagaysiga eegista caddaymaha."

Dhagaysiga eegista caddaymaha, adiga iyo qofka lacagta aad ku leedahay ("daymaysnaha") ayaa fiiriya lacagta iyo hantida daymaysnaha si aad u ogaato waxa uu awoodo inuu bixiyo. Adiga iyo daymaysnuhu waxa sidoo kale dhici karta inaad isla dejisaan qorshe lacag-bixin marka dhagaysiga eegista caddaymuhu socdo.

## Tallaabooyinka Bilaabidda Kiiska Eegista Caddaymaha

1. **Buuxi foomamka maxkamadda.**
2. **Hubi inuu damaysnuhu helo foomamka. ("Gaarsii" iyaga.)**
3. **U gudbi foomamka Maxkamadda Degmada, adigoo caddaynaya inaad "gaarsiisay" daymaysnaha.**
4. **Tag maalinta dhagaysiga maxkamadda.**

## 1. Buuxi foomka maxkamadda

**Go'aanka maxkamadda ee sheegashooyinka fudud - Waxa waajib ah inaad sugto 30 malamood kadib go'aanka kiiskaaga** Sheegooyinka Fudud inta aadan waydiisan maxkamadda dhagaysiga eegista caddaymaha.

- Ka soo qaado foomka "Ogaysiiska Dhagaysiga Eegista Caddaymaha Sheegashooyinka Fudud," karraaniga maxkamadda, kaasi oo ku qori doona taariikdha dhagaysiga oo saxeexi doona. Foomkan waxa la qaadaa lacag yar.

**Go'aanka kiiska madaniga ah** – Haddii go'aanka maxkamadda ee kiiskaaga madaniga ah ay ku jirto lacag laguu xukumo, waxaad u baahan tahay "Yeermada Eegista Caddaymaha." Foomkani wuxuu u sheegaa daymaysnaha inuu maxkamadda u yimaaddo dhagaysi taariikh iyo wakhti la sheegay. Waxa waajib ah inaad foomkan ka hesho karraaniga, waxa waajib ah inuu saxeexay karraanigu, waxaanad u baahan tahay inaad taariikh ka hesho karraaniga ah si aad ugu qorto foomkan kahor inta aadan gaarsiin daymaysnaha. Foomkan waxa la qaadaa lacag yar.

**Dokumentiyada** – labada foomba waxay leeyihiin meel lagu taxo dokumentiyada aad u baahan tahay inuu daymaysnuhu keeno dhagaysiga si ay uga caawiyaan inuu tilmaamo wuxuu awoodo inuu iska bixin karo. Tusaalayaashu waa bayaanada bangiga iyo cashuur celinta.

Markaad dhammayso buuxinta foomka, laba nuqul ka samee. Mid adigu hayso.

## 2. Gaarsii Daymaysnaha

"Gaarsiintu" waxay siinaysaa daymaysnaha ogaysiis ah inaad maxkamadda uga yeedhayso si aad lacagtaada uga hesho. Shaqada gaarsiinta waxa caadi ahaan qabta Sheriff-ka "Sarkaal Bilays". La xiriir xafiiska Sheriff-ka deegaankaaga si aad gaarsiinta u samayso.

**Marka la eego eegista caddaymaha sheegashooyinka fudud** waxa waajib ah inaad gaarsiiso dhinaca kale ugu yaraan 7 maalmood kahor taariikhda dhagaysiga eegista caddaymaha. In kastoo lacag dheeraad ah la qaado, waxaad waydiisan kartaa karraaniga inuu isku-dayo inuu u gaarsiiyo dhinaca kale. Waydiiso karraaniga haddaad u baahan tahay caawimadiisa arrintan.

**Marka la eego sheegista caddaymaha kiiska madaniga ah,** waxa waajib ah inaad gaarsiiso daymaysnaha ugu yaraan 10 maalmood kahor taariikhda dhagaysiga eegista caddaymaha.

Waxa jira siyaabo kale oo lagu gaarsiiyo dhinaca kale. Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan ikhtiyaarada gaarsiinta, fadlan fiiri buug-yaraha "Gaarsiinta".

Sheriff-ku wuxuu adna ku soo diri dokumenti muujinaya in dhinaca kale la gaarsiiyey. Hayso tan si aad maxkamadda ugu gudbiso markaad gudbinayso waraaqahaaga.



## 3. U Gudbi Waraaqaha Maxkamadda

U soo qaado maxkamadda foomka aad gaarsiisay (Ogaysiiska Dhagaysiga Eegista Caddaymaha ee Cabashooyinka Fudud ama Yeermada Eegista Caddaymaha) iyo dokumentigaaga diritaanka ee ka yimi Sheriff-ka oo u gudbi. Waxa jiri doona lacag la qaado gudbinta markaad foomka maxkamadda keento.

## 4. Tag Maxkamadda

Waxa dhagaysi laguu qaban doonaa taariikhda maxkamaddu kuu sheegtay. Dhagaysigan, adiga iyo qofka lacagta aad ku leedahay ayaa la hadli doona xaakin. Tag dhagaysiga. Haddaad iman waydo, maxkamaddu waxa dhici karta inay soosaarto amarro aadan adigu door ku lahayn.